



Storybooks Canada

storybookscanada.ca


Nozibele iyo saddexdii timo

Written by: Tessa Welch

Illustrated by: Wiehan de Jager

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons

[Attribution 3.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0).

<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0>



Tessa Welch


Wiehan de Jager

Abdi Muse

Somali

Level 3

Nozibele iyo saddexdii timo





Wakhti dheer ka hor, saddex gabdhood
ayaa u baxay inay soo guurtan qoryo.



Dabadeed eeygii waxuu ogaaday in
 Nozibele ay sirtay. Sidaas darteed eeygii
 wuu orday oo ku orday wadadi illaa iyo
 tuulada. Laakiin walaalaha Nozibele ayaa
 halkaas ku sugayay iyagoo ulo waaweyn.
 Eeygii wuu jeestay oo wuu cararay,
 waliigiisna dib looma arag.



Waxay ahayd maalin kuulul sidaa darteed
 waxay aaden webiga si ay ugu soo
 dabaashaan. Way cayaaaren waxayna
 firdhiyeen kuna dabaasheen biyaha.



Si kadis ah, waxay xaqiiqsadeen in ay yihiin kuwa daahay. Waxay dib ugu soo dagdageen tuulada.



Markii eygii dib u soo laabtay, wuxuu raadiyay Nozibele. “Nozibele, xagee baad joogtaa?” ayuu ku qayliyey. “Waa ikan, sariirta hoosteeda,” ayay tiri tintii ugu horraysay. “Waa ikan, albaabka ka gadaashiisa,” ayay tiri tintii labaad. “Waa ikan, gudaha xerada,” ayay tiri tintii saddexaad.



Dhakhshaba sidaas tuu eeyga u tagay,
 Nozibele ayaa madaxa ka soosiibtay
 saddex timood. Waxay hal tin dhigtay
 sariirta hoosteeda, mid kalane albaabka
 gadaashiiisa, midna gudaha xerada.
 Kadibna waxay u carartay guriga sida ugu
 dhakhshaha badan oo ay awoodday.



Markii ay ku dhawaadeen guriga, Nozibele
 waxay saartay gaceenteeda qoorta. Waxay
 soo ilowday silsiladeedii! "Fadlan ila
 laabta!" ayay kabariday saaxiibbadeeda.
 Laakiin saaxiibbadeeda waxa ay dhaheen
 waa xilli! aad u dambe.




Sidaas darteed Nozibele ayaa kaligeed dib ku laabatay webiga. Way heshay silsiladeedi waxayna usoo dhaqsatay guriga. Laakiin waxay ku luntay mugdiga.



Maalin kasta waxay ku qasbanayd in ay wax kariso, nadiifiso oo u dhaqdo eeyga. Dabadeedna, maalin aya eeygii yidhi, “Nozibele, maanta waa in aan booqdaa saaxiibo, nadiifi guriga, cuntada kari, oo dhaq alaabta kahor intaan soo laaban.”



Meel fog waxay ka aragtay iftiin ka
imaanayo aqal. Waxay u dhakhsatay
dhinacisa waxayna garaacday albaabka.



Kadib eeygii wuxuu yidhi, "Sariirta ii
hagaaji!" Nozibele ayaa ku jawaabtay,
"Waliigay marna sarir uma hagaajinin
eey." "Sariirta hagaaji, ama waan ku
qaniini doonaa!" ayuu eeygi yidhi. Sidaas
darteed Nozibele way hagaajisay sariirti.



La yaabkeda, ey aya ka furay albaabka oo ku yidhi, “Maxaad doonaysaa?” “Waan lumay waxaana u baahanahay meel aan seexo,” ayay Nozibele tidhi. “Soogal, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu yidhi eygi. Sidaas darteed Nozibele way gashay gudaha.



Kadib eeygii wuxuu ku yidhi, “Cunto ii kari!” “Laakiin waligay marna wax uma karrinin eey,” ayay ku jawaabtay. “Kari, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu eeyga yidhi. Sidaas darteed Nozibele waxeey xoogaa cunto ah u karisay eeygii.